Somaliska

Faktablad för arbetssökande –
Arbetspraktik

2017-02

Tababarka shaqada

Ma doonaysaa inaas shaqo goob shaqo ku tijiaabiso? Ma doonaysaa inaad khibradda shaqada hesho, taasoo kordhin doonto fursadda shaqo helida? Xaaladaas tababarka shaqada ayaa kugu habboon. Haddii suuqa shaqada dalka Iswiidan aad khibrad gebi ahaan u lahayn ama in yar u leedahay, waxaan ka caawini karnaa qiimaynta karti-xirfadeedkaaga.

Waa maxay macnaha tababarka shaqada?

Macnaha tababarka shaqada waxaa weeyaan, in sida aad jihaynta shaqada, tababarka xirfadda shaqada ama ku haysato kuna xoojiso karti-xirfadeedkaaga awgood lagu siin doono fursad aad shaqo ku tijaabiso goob shaqo. Teeda kale, haddii aad ku talo jirto inaad isku diyaariso hirgelinta dhaqdhaqaaqa ganacsiyeed, waa lagu siin karaa tababarka shaqada.

Maxay yihiin shuruudaha lagu helo booska tababarka shaqada?

Hawlwadeneha arrimaha shaqada adiga ku qaabilsan, ayaa wuxuu ku dhaqaaqayaa qiimaynta fursadaha aad shaqo helida u leedahay. Qiimaynta hawlwadeneha arrimaha shaqada adiga ku qaabilsan, waxay ku salaysan tahay khibradahaaga iyo laamaha ganacsiga ee aad shaqada ka raadsanayso. Haseyeeshe, waxaa xitaa la tixgelinayaa xaalad-dhaqaaleedka xilligaas jirta.

Tan kale waa in mid kamid shuruudaha hoos ku qoran buuxin kartaa:

- da’daada aysan 25 sano ka yarayn, shaqo-doone ahaan Xafiiska Shaqada iska diiwan gelisay, ama ay jirto in shaqo la’aan kugu dhacdo.
- aad tahay qof da’yar oo itaaldarran, taasoo saamayn ku yeelan karto kartida shaqaysashada.
- da’daada tahay 18 sano fursad-na ku lahayn suuqa shaqada.
- da’daada tahay 20 sano kuna khuseeya heshiis-waxbarashadeed.
- ku khuseeya xeerka Waxkaqabadyada sal-dhigida [etableringsinsatser] loogu talagalay soo-galeetiga cusub qaarkooda.
- Ka-qayb gasho qorsheha damaanada shaqada [jobbgarantin] ee dhallinyarada loogu talagalay ama damaanada shaqada iyo horumarka [jobb- och utvecklingsgarantin].

Halkee tababarka shaqada ka heli karaa?

Tababarka shaqada waxaad ka heli kartaa shirkadaha gaar ahaanta loo leeyahay iyo kuwa dowladda ba.

Ilaa intee ayaan tababarka shaqada wadan karaa?

Tababarka shaqada waxaad wadan kartaa ugu badnaantii lex bilood. Haddiise aad ka qaybqaadato damaanada shaqada ee dhallinyarada loogu talagalay waxaad tababarka shaqada wadan kartaa ugu badnaantii saddex bilood.

Lacag miyaa lay siinayaa?

Mudada tababarka waxaa lagu siinayaa lacagaha loo yaqaanno [aktivitetsstöd] ama [utvecklingsersättning]. Lacagahaas waxaa bixisa Khasnadda caymiska bulshada [Försäkringskassan]. Isla hey'adaas ayaa lacagaha xisaabiso oona bixintooda go'aan ka gaarto. Warbixin dheeraad ku saabsan lacagaha [*Aktivitetsstöd*] iyo [*utvecklingsersättning*] waxaad ka aqrisan kartaa shabakadda internetka *forsakringskassan.se*.

Haddii aad diido inaad ka faa'iidaysato fursadda tababarka shaqada, waxaa suuragal noqon karto in aan lagu siin wax lacag ah. Sidaasoo kale, waxaa ka lummi karo xaqa qaadashada lacagaha noocaas ah, haddii sabab la qaadan karo la'aan aad joojiso ka faa'iidaysashada tababarka shaqada.

Soo caymis ma lihi?

Mudada tababarka waxaad ku jirta heshiis caymis, waxaana ku khuseeya caymisyada loo yaqaanno [personskade- och grupplivförsäkringar]. Haddii mudada tababarka aad wax ka halayso shirkadda, waxaa suuragal noqon karto in dowlada ay loo shaqeeyeha magdhow siiso. Warbixin dheeraad ku saabsan caymisyada [*Försäkringsskydd*] iyo *[skadeersättningsansvar vid vissa arbetsmarknadspolitiska program]* waxaad ka aqrisan shabakadda internetka arbetsformedlingen.se.

Shuruudaha kale ee aniga i khuseeya maxay yihiin?

Maadaama shaqada ay tababar ku salaysan tahay, kuma khuseeyso xeerka deegaanka shaqada [arbetsmiljölagen]. Laakinse qaar qodobada sharcigaas ku xusan ayaa adiga ku khuseeyn kara. Warbixin dheeraad ka aqriso qoraal-warbixineedka mas'uuliyadda loo shaqeeyeha ee xiriirka la leh deegaanka shaqada [*Arbetsgivarens arbetsmiljöansvar*].

Waa maxay qiimaynta karti-xirfadeedka?

Macnaha qiimaynta karti-xirfadeed waxaa weeyaan, in xilliga tababarka shaqada lagu qiimayn doono karti-xirfadeedkaaga, waa haddii aad khibrad suuqa shaqada dalka Iswiidan gebi ahaan u lahayn. Qiimaynta waxay wax ku tari doontaa markii aad dalkaan shaqo ka raadsanayso.

Mudada qiimaynta karti-xirfadeedka waxay noqon kartaa hal maalin ilaa saddex toddobaad.
Markii karti-xirfadeedkaaga la qiimaynaayo waxaa lagu yeelay qof horjogehaaha ah. Qofkaas ayaa qiimaynta mas'uul ka ah.

Sidee ba hawlaha loo kala qaybsaday?

Haddii aad warbixn dheeraad ku saabsan tababarka shaqada ama qiimaynta karti-xirfadeedka la xiriir Xafiiska Shaqada. Haddii hawlwadeneha arrimaha shaqada adiga ku qaabilsan u go'aamiyo in tababarka shaqada lagu siiyo, wadajir ayaa tababarka shaqada u qorsheynaysaan. Kahor intii aadan tababarka shaqada bilaabin wuxuu hawlwadeneha arrimaha shaqada wada-hadal la yeelanayaa wakiilada ururrada. Xilliga tababarka shaqada ku talogal in wada-hadal tixraacid

ku salaysan, dhaqdhaqaaq shaqo raadsasho ama hogaamin awgood lagugu yeero.

Markii tababarka shaqada u dhamaado waxaa goobta tababarka shaqada laga siinayaa caddayn. Taasoo ku qoran khibradihii goobta shaqada laga siiyay. Haddii laga ballan qaaday in karti-xirfadeed la qiimeeyo, waxaa natiijada lagu qori doonaa caddayntaas.

Nidaamyada

Sharciga (2000:625) barnaamijka siyaasadda suuqa shaqada
Xeer-maamuleedka (2000:634) barnaamijka siyaasadda suuqa shaqada
Xeer-maamuleedka (1996:1100) Kaalmo-dhaqaaleedka dhaqdhaqaaqa shaqada

Nagala soo xiriir 0771-416 416 haddii arrintaan aad xiisaynayso ama aad doonayso warbixin dheeraad ah. Waxaad kaloo booqan kartaa shabakadda internetka Xafiiska Shaqada arbetsformedlingen.se